

## **Sharciga Xuquuqda Ka Qayb qaataha ee Tijaabada ah**

Shaqli kasta oo la weydiisto inuu ka qaybqaato daraasadda cilmi baarista wuxuu xaq u leeyahay:

1. Inuu ogaado habka iyo ujeedada daraasada.
  2. In la siiyo sharaxaad ku saabsan hababka loo raacayo daraasada cilmi baarista, iyo haddii mid ka mid ah daawooyinka, qalabka, ama hababka uu ka duwan yahay waxa loo isticmaali lahaa waxqabadka caadiga ah.
  3. Marka la eego qeexitaanada waxyeelo kasta, dhibaatooyinka, ama khataro aad si macquul ah u filan karto inay dhacaan inta daraasadu socoto.
  4. Inuu oggaado faa'ido kasta oo sida macquulka ah laga filan karo ka qaybgalka daraasada, haddii ay jiraan.
  5. In la ogeysiyo wax kasta oo ku saabsan habraacyada kale, daawooyinka, ama aaladaha laga yaabo inay ku caawiyaan, iyo khartooda iyo faa'iidooyinka laga helo marka la barbar dhigo hababka la soo jeediyay, daawooyinka ama qalabka.
  6. In loo sheego noocyada daaweynta, haddii ay jiraan, la heli karo haddii dhibaatooyin yimaadaan.
  7. In la siiyo fursad uu ku weydiyo su'aalo kasta oo khuseeya daraasada cilmi baarista kahor inta aan la oggolaan ka qaybgalka iyo waqtii kasta inta lagu jiro muddada daraasadda.
  8. In la ogeysiyo shaqsiyaadka inay diidi karaan ka qaybgalka daraasada cilmi baarista. Ka qaybgalku waa ikhtiyaari. Ka qaybgalayaasha cilmi baaristu waxa laga yaabaa inay diidaan inay ka jawaabaan su'aal kasta ama ay joojiyaan ka qaybgalkooda waqtii kasta ayagoo aan ciqaab la kulmeyn ama lumin faa'iidooyinka laga yaabo inay xaq u leeyihiin. Go'aankoodu ma saameyn doono xaqa ay u leeyihiin inay helaan daryeelka ay heli lahaayeen haddii aysan gelin tijaabada.
  9. In la siiyo nuqlu saxiixan oo leh taariikh ahna foomka oggolaanshaha qoraalka ah iyo nuqluka foomkaan.
  10. In la siiyo fursadda ay si xor ah u go'aansan karaan inay oggolaadaan daraasadda cilmi baarista iyo in kale iyada oo aan wax xoog ah, qasab ah, ama saameyn loo geysaneyn.
- 

Haddii aad qabto su'aalo ama walaacyo la xariria cilmi baarista la xariir cilmi baarisyaasha lagu qoray qaybta kore ee foomka oggolaanshaha.

Haddii aadan awoodin inaad la xariirto xubin ka tirsan kooxda cilmi baarista oo aad qabto su'aalo guud, ama aad qabto walaac ama cabasho ku saabsan cilmi baarista, kooxda cilmi baarista, ama su'aalo ku saabsan xuquuqdaada ka qaybqaate cilmi-baarista ahaan, fadlan la xiriir:

- UC San Diego Office of IRB Administration ood kala xariiri karto [irb@ucsd.edu](mailto:irb@ucsd.edu) ama 858-246-4777